

Baaritaanka qaaxada qarsoon ee UK

Raajada xabadkaaga wuxuu muujinayaa in aadan sanbabka ku qabin qaaxo (TB). Kani waa war wanaagsan. Waxaad hadda codsan kartaa fiisadaada dalka UK, adigoo xusuusanaya inaad ku darto shahaadada sheegaayo inaad qabin TB.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in aad ogaato in qaaxada kugu dhici karo markaad timaaddo dalka UK.

Kani sababtiisa waxaa weeye 1 ka mid ah 4 qofood ayaa qabo jeermiis qaaxo oo ku qarsoon jirkooda – lagu yaqaano 'Qaaxada Qarsoon'. Qaaxada qarsoon lagama arki karo raajada xabadka, sidaas darteed waxaa laga yaabaa in jirkaaga ku jiro qaaxada qarsoon adigoo aan ogayn. Qaaxada qarsoon ayaa soo toosi karo waqti kasta ee mustaqbalka oo waad ku xanuunsan kartaa. Si kastaba ha ahaatee, waxay u badan tahay inuu tooso iyo ku xanuunsato sanadaha ugu horreeyo ee aad ku nooshahay dalka UK.

QAAXADA FIRFIRCOON



Astaamaha:
qufac, qandho,
miisaan lumis,
gaajo la'aan,
dhidid habeenkii,
daal

- Bakteeriyada qaaxada way 'soo jeedaan'
- waxaad dareemi doontaa xanuun
- waxaad qaaxada u gudbin kartaa dadka kale

QAAXADA QARSOON



Waxaad haysataa
1 ilaa 10 fursad
inuu kugu dhaco qaaxada firfircoon

- Bakteeriyadu waa 'hurdaa'
- ma dareemaysid xanuun
- qaaxada uma gudbin doontid dadka kale



TB Alert waa ururka Qaaxada ah ee qaranka ee dalka UK, waxayna la shaqeeyaan Caafimaadka Dadweynaha Ingiriiska iyo Adeegga Caafimaadka Qaranka si ay u daryeelaan caafimaadka bulshooyinka ay saameeyeen qaaxada. Faahfaahin intaas ka badan oo ku saabsan Qaaxada qarsoon ka eeg www.thetruthabouttb.org/latent-tb

Nasiib wanaag, qaaxada qarsoon waxaa lagu daaweyn karaa antibiyootiko ka hor intii aadan ku xanuunsan.

Ka dib markii aad timaado dalka UK waxaad isku diiwaan gelin kartaa takhtarka qoyska ee Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) oo lagu magacaabo Takhtarka Guud ama 'GP'. GP'gaaga ayaa laga yaabo inuu kugu sameeyo baaritaan dhiig si loo hubiyo haddii aad qabto Qaaxada qarsoon. Haddii aad qabto Qaaxada qarsoon waxaa lagu siin doonaa daawayn kugu caawiya dilitaanka jeermiska iyo ilaalinta caafimaadkaaga

mustaqbalka. Baaritaanka iyo daaweynta waa qarsoodi iyo lacag la'aan, iyo ma saamayn doono xaaladdaada fiisada ama xaqa aad u leedahay inaad sii joogtid dalka UK.

Si ammaan ah ku hayso qoraalkan si uu kuu xusuusiyo inaad iska diiwaangeliyo GP, ama si aad si deg deg ah u aragto takhtar haddii aad yeelato calaamadaha qaaxada.



Waxaad GP'gaaga kuugu dhow ka heli kartaa www.thetruthabouttb.org/FindaGP